

WASAARADDA H ORUMARINTA
MAALIYADDA



وزارة المالية والتطوير
MINISTRY OF FINANCE
DEVELOPMENT



**Wasaaradda Horumarinta
Maaliyadda JSL**

Wargeyska Danjire

**Nidaamka Casriyeynta
Nootaayooyinka ee Qabashada Dakhliga
Cashuuraha Kala-Wareejinta libka Hantida
Ma-Guurtada iyo Guurtadaba.**

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Fariin Digniin Iyo Waano Iskugu Jirta U Diray Dadka Caadaystay Inay Ka Shaqeeyaan Kootarabaanka

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Iyo Hay'adda UNICEF Ayaa Daah-Furay Kulan Dib-Loogu Eegayey Qoondada Miisaaniyadda Ku Baxda Wadaagayaasha Waxbarashada Iyo Caafimaadka Iyo Waxtarka Adeeg-Bixinta.

Kulamo Lagaga Arinsanayo Tayeynta iyo Kor-U-Qaadista Adeeg-Bixinta Dekedda Caalamiga Ah Ee Berbera Oo Ka Qabsoomay Magaalada Berbera.

"Wixii aad cabasho ama talo qabto
waxa aad nagula wadaagi kartaa."



9494



Info@slmof.org
Slmof.org



W A A X D A X / D A D W E Y N A H A & X O G T A

APRIL - JUNE 2024

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah, kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Waxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.



Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: Info@slmof.org ama formka cabashada iyo talooyinka ee Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us



Tusmada

Nidaamka Casriyeynta Nootaayoyinka Ee Qabashada Dakhliga Cashuuraha Kala-Wareejinta Iibka Hantida Ma-Guurtada iyo Guurtadaba.	2
Munaasabadda Dhagaxdhiga Dhismaha Kastamka Laanta Dabo-Goryaale Ee Gobolka Daadmadheedh.....	7
.....	7
Kulamo Lagaga Arinsanayo Tayeynta iyo Kor-U-Qaadista Adeeg-Bixinta Dekedda Caalamiga Ah Ee Berbera Oo Ka Qabsoomay Magaalada Berbera.	10
Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Ayaa Boorama Ku Daa-huray Kulan lagaga hadlayey Miisaaniyadda Dawladda iyo Caruurta.	12
Kulamo Lagu Dardargalino Habsami-U-Socodka Hawlaha Xafiisyada Dakhli Soosaarka Dawladda Ee Gobolada Iyo Degmooyinka Dalka.	14
Nuxurka Kulankii Ka Qabsoomay Magaalo Ganacsiyeedka Tog-Wajaale Oo Ay Ka Soo Qayb-Galeen Shan Dawladdood Iyo Hay'addo Caalami Ah.....	16
Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Fariin Digniin Iyo Waano Isku-gu Jirta U Diray Dadka Caadaystay Inay Ka	20
Shaqeeyaan Kootarabaanka	20
Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Xadhiga Ka Jaray Kastam Cusub Oo Laga Hirgeliyay Garroonka.....	21
Diyaardaha Ee Magaaadda Boorama.....	21
Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Axmed Wayrax Oo Kulan Aqoon-Korodhsi ah u Furay Qaar ka Mid ah Shaqaalaha Wasaaradda Ee Gobolka Awdal Gaar Ahaan Degmada Borama.....	23
Bugga Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha	26

Nidaamka Casriyeynta Nootaayooyinka Ee Qabashada Dakhliga Cashuuraha Kala-Wareejinta Iibka Hantida Ma-Guurtada iyo Guurtadaba.



Hargeisa 08 April, 2024 [W.H.M] - Wasiirada Wasaaraddaha Cadaaladda iyo Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Saleebaan Warsame Guuleed iyo Dr. Sacad Cali Shire ayaa 08 April, 2024 si rasmi ah magaalada Hargaysa ugu daah-furay Nidaamka Casriyeynta Nootaayooyinka (E-Payment Notary System) ee qabashada dakhliga cashuuraha Kala-Wareejinta Iibka Hantida Guurtada iyo Maguurtada sida (Dhulka, Dhismaha, iyo Gaadiidka).



Iyada oo laga duulayo baahida loo qabo nidaaminta iyo sugida dakhliga cashuurta kala-wareejinta iibka hantida, iibkaas oo sida rasmiga ah ka dhaca Nootaayooyinka dhexdooda waxa lagama maarmaan noqotay in la yagleelo hanaan is-wada oo casriya kaas oo lagu maaraynayo qabashada dakhliga cashuuraha ku waajibay marka hanti la kala iibsado.



Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyada oo ka duulaysa baahida loo qabo nidaaminta iyo sugida dakhliga cashuurta kala-wareejinta iibka hantida, isla markaasna ka shidaal-qaadanaysa kulamadii is-xig-xigay ee ay wada yeesheen Wasaaraddaha Maaliyadda, Cadaaladda iyo Gudiga Nootaayooyinku, waxa ay bulshada iyo bahda nootaayooyinkaba la socodsiiinaysaa in Wasaaradda Maaliyaddu yagleeshay hanaan is-wada oo casriya kaas oo lagu maarayn doono qabashada dakhliga cashuuraha ku waajibay marka hanti la kala iibsado.



Hawsha hirgalinta barnaamijkan oo mudaba soo socotay ugu danbayn ayey wajigeedii 1-aad labada Wasaaraddood si wadajira u daah-fureen iyada oo wajiga xigana loo gudbin doono Gobolada iyo degmooyinka dalka hadii rabi ogolaado.

Iyada oo hada wixii ka danbeeya Nootaayooyinku ay adeegsan doonaan nidaamkan cusub ee online-ka ah ee la soo kordhiyey maadaama ay kaliya sharci tahay warqadda heshiiska ee laga daabaco gudihiisa. Waxa iyaduna xusid mudan in cashuurta kala-wareejinta dhulka, dhismaha, baabuurta iyo wixii la hal-maala lagu dhex bixin doono xafiiska nootaayada dhexdiisa.

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL iyo Hay'adda UNICEF Ayaa Daah-furay kulan Dib-Loogu Eegayey Qoondada Miisaaniyadda Ku Baxda Wadaagayaasha Waxbarashada iyo Caafimaadka Iyo Waxtarka Adeeg-Bixinta Labadaa Qaybood.



Hargeisa 23 April 2024 {WHM} - Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Saleebaan Jaamac Diiriye oo ay weheliyaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada Dr. Cabdirazaq Jaamac Nuur iyo Madaxa Siyaasadda Arrimaha Bulshada UNICEF Md. Jose Maria Bendito ayaa 23 April 2024 furay kulan-hawleed laba maalmood ah oo ay si wada jira u soo agaasimeen Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Hay'adda Unicef, kaas oo ujeedkiisu daarranaa dib-u-eegis lagu samaynayey isticmaalka Miisaaniyadda [kharashka] Wadaagayaasha Waxbarashada iyo Caafimaadka.



Waxaana intii kulan-hawleedku socday lagu soo bandhigay warbixin la xidhiidha daraasad kooban oo laga sameeyey qoondada kharashaadka ama miisaaniyadda ay helaan labada Wasaaradood ee Waxbarshada iyo Caafimaadku iyo waxtarka bixinta adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka Dalka.



Waxbixintan ayaa diirada saaraysa miisaaniyadda ilaa 10-kii sadood ee u danbeeyey ee ay helayeen labadan Wasaaradood iyo ilaa heerka ay gaadhsiisantahay adeeg bixinta waxbarashada iyo caafimaadku.



Waxaana lafo-gur iyo falanqayn kadib kulankaas laga soo saaray talo bixin farta ku fiqaysa ama tilmaamaysa meelaha adeegayadaasi ka hooseeyaan ee u baahan in laga toosiyo ama laga horumariyo iyada oo bar-billow laga dhigan doono ilaa heerka ay hada gaadhsiisanyihiin.



Munaasabadda Dhagaxdhiga Dhismaha Kastamka Laanta Dabo-Goryaale Ee Gobolka Daadmadheedh.



Oodweyne 06 June, 2024 {WHM} - Agaasimaha Guud ee Wasaarada Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Xuseen Cismaan {Mu'adinka} oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Kastamada Md. Faysal Aaden Yuusuf {Faysal-dheere} ayaa dhagaxdhigay dhismaha Kastamka Laanta Dabo-Goryaale ee Gobolka Daadmadheedh, iyada oo dhismihii hore ee Kastamku ahaa mid kiro ah.



Munaasabadda dhagaxdhiga oo ay goob-joog ka ahaayeen Guddoomiyaha Gobolka Daadmadheedh Md. Cabdiraxiin Muxumed Axmed, Maayir-xigeenka Degmada Oodwayne Md. Maxamud Macalin Axmed, Taliye-Xigeenka Qaybta Illaalada Cashuuraha Somaliland Gaashaanle Yaasiin Ismacil Shiil, Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka Daadmadheedh S/Xidigle Ismaaciil Cali Xassan, xildhibaano ka tirsan Golaha Deegaanka Degmada Oodweyne, duqay iyo waxgarad ka soo jeeda deegaanka oo u kala danbeeyey hadaladii laga jeediyey madasha lagu daah-furay dhismaha cusub ee laga yagleelay deegaanka xuduuda dhaca ee Dabo-

gorayaale oo hoos taga gobolka Daad-Madheedh ayaa dhamaantood soo dhaweeyey mashruucan wax-ku-oolka ah ee lagu soo kordhiyey deegaanka, iyada oo dhagax dhiga ka dibna si rasmi ah loo bilaabay hawsha dhismaha.



Xafiiska Laanta Kamtamkan Dabo-goryaale ayaa ku yaala goob muhiim ah, isaga oo u adeega oo ay wax ku cashuurtaan ganacsatada iyo dadweynaha Gobolada Daadmadheedh iyo Togdheer, waxaanu deegaan ahaan iyo dawlad ahaanba leeyahay faa'iido dhaqaale iyo mid ka hortag, waxaana maalgalinaysa dhismihiisa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Dhismahan cusub ee Kaŕtamku waxa uu ka koobnaan doonaa xafiisyadii ciidanka illaalada cashuuraha, xafiisyadii dakhli qabashada iyo dhamaan adeegyadii looga baahnaa kaŕtam



Ugu danbayna, Agaasimaha Guud iyo masuuliyiinta safarka shaqo ku wehelinaysay ayaa ka dib munaasabadda dhagaxdhiga dhismaha Laanta Kaŕtamka Dabo-goryaale waxa ay u soo baqooleen dhinaca Gobolka M/Jeex

iyaga oo safarkooda ku soo afmeeray kormeer ay ku tageen Kastamka Ina-Guuxaa ee Degmada Salaxlay, halkaasi oo ay kulamo kula yeeshen warbixinana ku kala qaateen maamulka kastamka, masuuliyiinta degmada Salaxlay iyo qaar ka mid ah ganacsatada wax ka cashuurata Kastamka. Waxaana halkaa la is kula qaatay in laga wada shaqeeyo la dagaalanka kootarabaanka, geešta kalana masuuliyiinta Wasaaradda Maaliyadda ayaa dhinacooda ka balanqaaday in wixii cabasho ah ee dhinacooda laga soo sheegto ay si degdeg ah wax uga qaban doonaan, iyaga oo u raacaya nidaamka iyo xeerarka.



Kulamo Lagaga Arinsanayo Tayeynta iyo Kor-U-Qaadista Adeeg-Bixinta Dekedda Caalamiga Ah Ee Berbera Oo Ka Qabsoomay Magaalada Berbera.



Berbera 04 June, 2024 {WHM} - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo uu weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Md. Maxamed Xuseen Cismaan iyo masuuliyiin kale oo kormeer shaqo ku tagay Magaalada Berbera ee Xarunta Gobolka Saaxil ayaa kulamo goonigooni ah la qaatay guud ahaan daneeyayaasha Marsada Caalamiga ah ee Berbera, taasi oo ay ugu kuurgalayeen sida ay u socdaan hawlaha adeeg-bixinta Dekedda iyo Kastamku, waxaana intii ay ku gudo jireen kormeerkooda kulamo ay la qaateen:

- Daneeyayaasha Dekedda Berbera {Port community}.
- Shirkadda DP World.
- Maamulka Kastamka Berbera.
- Ururka Mukhalasiinta ee SOFA.
- Maamulka Xafiiska heer gobol ee Cashuuraha-Berriga.

Waxaana afar ka mid ah kulamadaasi diirada lagu saarayey oo ay ku saabsanaayeen fududaynta guud ahaan hanaanka la bixiista badeecaddaha soo degaya iyo kuwa dhoofayaba iyo sidoo kale daryeelka macmiilka.



Waxaana gunaanadkii kulan-hawleedyadaasi mabda'iyay la is la qaatay in laga saaro ama la isku ururiyo farsamo ahaan meelaha laga dhimi karo talabooyinka ay maraan macaamiisha ku xidhan dekeddu marka ay badeecadda cashuuranyaan iyo in la wanaajiyo wada shaqaynta macaamiisha iyo hawl-wadeenada Dekedda iyo Kastamkaba, dhamaan cabashooyinka ay soo bandhigeen macaamishuna si dhakhso ah looga jawaabo iyadoo la raacayo shuruucda.



Marsada Caalamiga ah ee Berbera oo ku taal goob muhiim ah ayaa lagu sameeyey sanadihii u danbeeyey balaadhin iyo casriyeyn, kadib markii ay xukumadda Somaliland iyo Masuuliyiinta Shirkadda DP World ee laga leeyahay dalka Isutaga Imaarat-ka Carabtu kala saxeexdeen 5-tii September, 2016-kii heshiis lagu maalgelinayo. Kadib hirgalinta mashruucaas balaadhinta iyo casriyeynta ee lagu sameeyey Dekedda Berbera, isla markaana soo jiidatay indhaha caalamka, iyada oo hada isu diyaarinaysa inay noqoto goob ay adeegsadaan wadamada gobolku guud ahaan. Geesta kale waa isha dakhli ee ugu weyn Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland, iyada oo arimaha laga shidaal qaadanayo waxa jira kulamo joogto ah oo ay daneeyayaashu is kaga yimaadaan bishiiba hal mar.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Ayaa Boorama Ku Daahuray Kulan lagaga hadlayey Miisaaniyadda Dawladda iyo Caruurta.



Boorama 11 May 2024 [W.H.M] - Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) ayaa Magaaladda Boorama ka furay Kulan lagaga hadlayey Miisaaniyadda Dawladda iyo Caruurta, taas oo lagu falanqeyey:-

1. Adeeg-bixinta ay caruurta ka helaan Miisaaniyadda Dawladda.
2. Heerka ay gaadhsiiin tahay adeeg-bixinta Miisaaniyadda ee dhinaca Caruurta.
3. Qaybinta khayraadka Dawliga ah, iyadoo la raacayo hab u faai'daynaya caruurta, isla markaana yaraynaya baahiyaha ay qabaan caruurta.
4. Sidii ay caruurta u heli lahaayeen Saamiga ugu macquulsan ee wadaagayaasha (Sectors) bixiya adeegyada la xidhiidha baahiyaha caruurta sida Waxbarashada, Caafimaadka, Biyaha iyo Daryeelka.



Kulankaas oo ka qabsoomay Hotelka RAYS ee magaaladda Boorama oo ay si wada jir ah usoo qabanqaabiyeen Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Hay'adda UNICEF ayaa waxa ka soo qaybgalay Maayirada iyo Saraakiil sare oo ka socday Dawladdaha Hoose ee Boorama, Gabiley, Hargeysa, Berbera, Sheekh, Burco, Oodwayne, guddi-hoosaadyada Golaha Wakiilada ee guddida dhaqaalaha iyo guddida Arrimaha bulshadda, Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda horumarinta caafimaadka iyo Wasaaradda Qorshaynta Qaranka.

Duqa magaalada Borama Md. Maxamed Axmed Warsame oo ay magaaladiisu martigalinaysay kulanka ayaa soo dhaweeyey masuuliyiinta qaybta ka ah ee lagu casuumay kulanka.



Kulamada Lagu Dardargalino Habsami-U-Socodka Hawlaha Xafiisyada Dakhli Soosaarka Dawladda Ee Gobolada Iyo Degmooyinka Dalka.



Burco 5 June, 2024 {WHM} - Waxa xarunta Guddoomiye Gobolka Togdheer ee magaaladda Burco ka qabsomay shirar lagaga arinsanayey dardargalinta habsami-u-socodka dakhliga gobolka Togdheer, shirarkaasi oo ay wada yeesheen madax ka socota Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland oo uu hogaaminayo Agaasimaha Guud Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) iyo qaar ka mida Hay'addaha Dawladda ee heer gobol iyo heer degmo waxa goob joog ka ahaa Gudoomiyaha Gobolka Togdheer Md. Jaamac Cabdilaahi (Biin) iyo Ku-Xigeenkiisa.



Waxaana ka mid ahaa kulamadaasi mid ay masuuliyiinta Wasaaradda Maaliyadu la yeesheen madaxda garsoorka Gobolka Togdheer oo ay ugu horeeyaan Xeer Illaaliyaha Gobolka, Guddoomiyaha Maxkamada Racfaanka iyo Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka Togdheer, iyada oo lagaga wada hadlay kulankaasi wadashaqayta Waaxda Garsoorka iyo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda gaar ahaan arimaha la xidhiidha

dhinacyada shuruuca maaliyada, fulinta ganaaxyada, dabaqaada habraacyada cashuuraha, la dagaalanka kootarabaanka iyo cashuur-diidka.



Geeṣta kale masuuliyiinta Wasaaradda Maaliyadda ayaa kulamo la qaatay qaar ka mid ah madaxda heer gobol iyo degmo ee Hay'addaha Dawladda qaarkood, kuwaasi oo ay kamid ahaayeen Dawladda-hoose ee Degmada Burco, Wakaaladda Biyaha Burco, Laanta Bangiga ee Gobolka iyo Cisbitaalka

Kulanka ayaa intii uu socday waxa lagaga wada hadlay sidii xil weyn la iskaga saari lahaa dakhliyada ka soo xarooda cashuuraha ku dhaca biilasha , cashuurta tigidhada (stamp tax) iyo waliba sidii looga wada shaqayn lahaa hirgalinta Cashuurta Iibka Adeegyadda iyo Badeecadaha ee loo soo gaabiyo GST (Goods & Services Tax). Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyadda ayaa intii kulamadaasi socdeen si gaara u xusay uguna mahadnaqay Wakaaladda Biyaha ee Burco iyaga oo sheegay inay si wanaagsan xil is kaga saareen dakhliga Cashuurta Tigidhada.



Ugu danbayn, safaradan shaqo ee maalmahanba masuuliyiinta Wasaaraddu ku galaabixinayeen qaar ka mid ah gobolada iyo degmooyinka dalku waxa ay qayb ka yihiin ololaha lix-billoodlaha ah ee uu dhawaantan iclaamiyey Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire, taas oo doorkan diirada lagu saarayo xoojinta wadashaqaynta Wasaaradda iyo Hay'addaha kale ee Dawladda iyo waliba sidoo kale ogaanshaha iyo ka falcelinta wixii cabashooyin ah ee jira geeṣta ay dooniba ha ka yimaadeene.

Nuxurka Kulankii Ka Qabsoomay Magaalo Ganacsiyeedka Tog-Wajaale Oo Ay Ka Soo Qayb-Galeen Shan Dawladdood Iyo Hay'addo Caalami Ah.



Hargeisa 08 May 2024 [W.H.M] - Wefti ka socdey Jamhuuriyadda Somaliland oo uu hogaaminayayey Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha JSL Md. Maxamed Kaahin Axmed, ayna ka mid ahaayeen waftiga Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire, Wasiirka Horumarinta Biyaha Md. Saleebaan Yuusuf Cali Koore, Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Md. Muuse Ibraahim Yuusuf (Selef), Gudoomiyaha Gobolka Gabiley Md. Cabdikariim Aaden X. Diiriye, Maayirka Gabiley iyo Maamulka Tog-wajaale, ayaa kaga qaybgalay magaalo xuduudeedka Tog-Wajaale kulan ay iskugu yimaadeen madax ka socotay dawladdaha geeska Africa, Kaas oo uu qayb ka yahay mashruuc ballaadhan oo ku saabsan horumarinta biyaha, gaar ahaana biyaha dhulka hoostooda oo loo soo saarayo Wajaale.





Shirkan oo muhiimad weyn u lahaa Jamhuuriyadda Somaliland waxa qayb ka ahaa Mashruuca Horumarinta Biyaha magaalada Tog-wajaale oo ku taala xadka u dhexeeya labada Dawladdood ee Somaliland iyo Ethiopia, iyadoo Tog-Wajaale ay ka mid tahay meelaha lagu samaynayo Biyo ballaadhinta muddo koobana lagu hirgelinayo.

Kulankan ka qabsomay 08 May 2024 magaalo ganacsiyeedka Wajaale waxaa ka soo qaybgalay Madaxweynaha Maamulka Soomalida ee Itoobiya Md. Mustafe Muxumed Cumar, Wasiirka Biyaha ee Dawladda Federaalka Itoobiya Eng. Habtamu, Wasiirka Biyaha ee Dawladda Uganda, Sam Champtories, Wasiirka Biyaha Dawladda South Suudaan, Pal Mai Deng, Wasiirka Biyaha ee Dawladda Jabuuti, Siciid Khayre, waxaa kale oo ka soo qaybgalay Hay'adaha caalamiga ah sida, UNDP, UNICEF, UNESCO iyo Baanka Adduunka.

Weftiga Jamhuuriyadda Somaliland waxay kulamo gooni gooni ah la qaateen weftiga ka socdey Urur Goboleedka IGAD, gaar ahaana Wasiirka Biyaha ee Dawladda Federaalka Itoobiya, iyadoo labada dhinac ay ka wada hadleen iskaashiga labada Dawladdood, sidoo kalena weftiga Somaliland waxay la kulmeen Madaxweynaha Maamulka Degaanka Soomaalida, mustafe Muxumed Cumar, iyadoo labada dhinaca ay ka wada hadleen adkaynta nabadgelyada labada Dal iyo isu socodka Ganacsiga.

Kulan-Hawleedka Waxqabadka Waaxaha Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee Sadex-Biloodka January- March 2024 Oo Qabsoomay



Hargeisa April 20, 2024 (WHM) – Kulan-hawleed lagu qiimaynayey waxqabadka Waaxaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ee sedex-biloodka January – March 2024 ayaa April 20, 2024 ka qabsoomay Hall-ka Shirarka Xafiiska Xisaabaadka Guud ee Dawladda.



Kulankaas oo sadexdii bilood ee kaftaba mar la qabto, ayey ujeedadiisu tahay sidii loo qiimeyn lahaa waxa Waax walba uga qabsoomay qorshihii loo dejiyey, iyada oo Agaasime Waaxeedyadda mid kasta gaarkiisa looga dhagaysto war-bixin ku saabsan wixii uga qabsoomay bartilmaameedkii Waaxdiisa mudadaa sadexda bilood ah u yaalay, hawlaha baaqday iyo asbaabaha ay u qabsoomi waayeen iyo sidoo kale caqabaddaha jira ee ka hor yimid.



Kulan-hawleedkaas oo ay goob-joog ka ahaayeen Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire, Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Md. Saleebaan Jaamac Diiriye, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) Iyo dhamaan Agaasimayaasha Waaxaha Wasaaradda horumarinta Maaliyadda, waxa laga dheehanayey war-bixinta waxqabadka Waaxaha ee saddex biloodlaha ah in horumar fiican laga sameeyey dhinacyo badan.

Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo furay kulan-hawleedka waxa ka mid ahaa hadalkiisii:



“Wuxuun baan doonayaa inaan idinku baraarujiyo ahmiyada uu leeyahay kulankan sedex-biloodlaha ah ee Wasaaraddu. Maamulku waa qorshe, fulin, dabogal iyo is-qimayn, waxa aynu halkan maanta u fadhinaa sidii aynu u qiimayn lahayn wixii ka qabsoomay qorshihii inoo yaalay January-March, 2024“.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Fariin Digniin Iyo Waano Iskugu Jirta U Diray Dadka Caadaystay Inay Ka Shaqeeyaan Kootarabaanka



Hargeisa 23 April, 2024 (WHM) - Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) ayaa fariin iskugu jirta waano iyo digniin u diray dadka caadaystay inay ka shaqeeyaan arimaha Kootarabaanka, isaga oo sheegay in sharciga la marin doono qofkasta oo lagu qabto isagoo kootarabaaninaya alaab.

Sidoo kale Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) waxa uu fariin mahadnaq iyo bogaadin ah u diray Cashuur-bixiyeyaasha sida wanaagsan u bixiya cashuuraha sharcu ku waajibiyey kuwaas oo uu uga mahadnaqay gudashada waajibaadkaas dalkoodu ku leeyahay. Ugu horayna isagoo Agaasimaha guud arimahaas ka hadlaysa waxa uu yidhi “Anagoo markasta u mahadnaqayna bulshadda Somaliland ee sida fiican u bixisa cashuuraha ku waajibay, isla markaana ku bogaadinaya sida wanaagsan ee ay u gutaan waajibaadkooda muwaadinimo, waxa aan halkan fariin u marinaynaa dadka qayb ka mid ah oo ku kaca waxa loo yaqaan kootarabaanka, kootarabaankaas oo u badan dhinaca Jaadka iyo Sharaabka Ethiopia ka imaada iyo shaambooga iyo Waxyaabaha la midka ah ee xuduudaha kasoo talaaba, waxa aanu uga digayanaa inaan looga naxariisanaynin oo waliba sharciga la marin doono dadkaas koontarabaanka caadaystay ee ka shaqeeya, kuwaas oo gacan bir ah lagu qabandoono”. Agaasimaha guud isagoo hadalkiisa sii wata waxa uu intaas raaciyey “Hawlgalo laxaad leh oo ciidamo ayaanu u diyarinay iyo shaqaale ka hawlgala oo goob walba taagan. Kuwaas oo aan laga baxsankarin isla markaasna u diyaarsan Hawlaha koontarabaanka ee loo xilsaaray, waanan hubaa inay wax badan ka qaban doonan, markaa waxaan guud ahaan uga digaynaa muwadiniinta caadaystay inay cashuurta ka baxsadaan oo ay koontarabaanka ka shaqeeyaan inay ka waantoobaan, waxaan ku waaninaynaa inay usoo noqdaan sharciga wadankooda oo ay ilaaliyaan oo ay iska daayaan khiyaamada, isla markaana ay cashuurta ku waajibtayna iska bixiyaan, iyagoo nabad qaba oo cafimaad qaba oo an dhibaato ka so gaadhin ay maraan goobaha cashuuraha lagu bixiyo ee Kastamada iyo Cashuuraha-Berriga. Ugu danbayn cidkasta oo ku xad-gudubta sharciyada dalka oo isku dayda inay alaab soo koontarabaaniyaan ama la waydaarta ama ka dhago adeyga shaqaalaha wasaraadadda horumarinta maaliyadda iyo ciidanka ilaalada cashuuruhu, ha ogaadan in sharciga la marin doono oo lagu maxkamadeen doono, waana la qabanayaa meelkasta oo ay joogaan marka lagu qabto koontarabaan iyaga oo wada, waanu uga digaynaa, waxaan leeyahay if iyo aakhiraba waxaa idiin roon in aydaan waxba khiyaamayn ee dalkiina iyo qarankiina daacad u ahaatan, cashuurta idinku waajibtayna iska bixisaan”.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Xadhiga Ka Jaray Kastam Cusub Oo Laga Hirgeliyay Garroonka Diyaardaha Ee Magaaadda Boorama



Boorama, June 27, 2024 (W.H.M) - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Somaliland Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka), ayaa xadhiga ka jaray Kastam cusub oo laga hirgeliyay magaaladda Boorama ee xarunta gobolka Awdal, kaas oo loogu tallo galay in lagu cashuuro waxyaabaha ka yimaada galbeedka magaaladda Boorama, iyadoo markii hore lagu cashuuri jiray kastamka deegaanka Goroyo-cawl.

Munaasibadii xadhig ka jarka kastamka cusub oo 30 April 2024 qabsoontay ayaa waxa ku wehelinayey agaasimaha guud agaasimaha waaxda kastamadda ee wasaaradda Maaliyadda Somaliland Faysal Dheere, xoghayaha dawladda hoose ee Boorama, iyo masuuliyiin kale.

Ugu horayna Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Somaliland Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) oo faah-faahin ka bixiyay baahida keentay in kastamkaas cusub la furo iyo shaqadda uu qaban doono, waxa hadalkiisii ka mid ahaa "Waxaan joognaa laan cusub oo kastam ah oo aanu ka furayno magaaladda Boorama, kaas oo ku yaalla agagaarka garroonka diyaaradaha ee magaaladda Boorama, isla markaana noqon doona mid mihiimadiisa leh, iyadoo maanta laga bilaabo laantani ay noqon doonto meel lagu cashuuro wixii badeecado ah ee soo mara, ee ka yimaadda Galbeedka, halkii markii hore laga gayn jiray Kastamka Garoyo-cawl, taasoo u jeeddada laga leeyahay ay tahay in loo fududeeyo ganacsatadda iyo dadka wax cashuuranaaya adeegyada cashuur-qabashada si aanay dhibaato uga mudanin, isla markaana iyagoo aan gaadiidkoodda la kaxaynin ilaa Goroyo-cawl imika wixii ka danbeeya halkan loogu qaban doono adeegyadii ay u baahnaayeen oo dhan. Markaa maanta laga bilaabo hawshaasi sidaa ayey ku bilaabantay, gaadhigii u horeeyay ayaana lagu cashuurayaa. Waxaan rejaynaynaa in ay noqon doonto meel barakaysan oo u adeegta umadda oo dhan Insha Allaah".

Sidoo kale Xoghayaha Dawladda Hoose ee Boorama Eng. C/laahi Xasan Raage oo isaguna madashaasi xadhig ka jarka kastamka cusub hadal ka jeediyey, ayaa isna sheegay in laantaas cusub ee kastamku ay fududayn doonto hawlaha cashuuraha, waxaanu yidhi "Halkan aanu hada ku sugan nahay waa

kastam cusub oo laga furay garoonka diyaaradaha ee magaaladda Boorama, kaasoo noqonaya laantii saddexaad ee laga furo magaaladan Boorama. Goobtani waxay u addeegi doontaa ganacsatadda galbeedka ka imanaysa, haday qaad tahay, iyo haday khudrad tahayba, taasoo fududayn doontaa socodkii iyo gaadiidkii uu wakhtigu kaga lumi jiray in ay tagaan Goroyo-cawl”.

dhinaca kale agaasimaha guud ee wasaaradda Maaliyadda Somaliland Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) oo uu wehelinayay agaasimaha waaxda Kastamada ee wasaaradda Maaliyada ayaa waxay kulan lagu dar-dar gelinayo Hawlaha cashuur-qabashada la qaateen maamulka gobolka Awdal, isagoona agaasimaha guud soo kormeeray xarunta wasaaradda maaliyadda ee gobolka Awdal, waxaanu halkaa kulan xog waraysi ah kula yeeshay maamulka kastamkaasi, iyo shaqaalaha kala duwan ee ka hawl gala.

Waxaanay masuuliyiinta kastamka Boorama halkaasi warbixino la xidhiidha hawlhooda shaqo ku siiyeen agaasimaha guud ee Wasaaradda horumarinta Maaliyadda, isagoona agaasimaha guud xubnahaasi ku adkeeyay in ay si daacad ah qaranka ugu addeegaan, isla markaana ay ka soo baxaan waajibaadkooda shaqo.

Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Axmed Wayrax Oo Kulan Aqoon-Korodhsi ah u Furay Qaar ka Mid ah Shaqaalaha Wasaaradda Ee Gobolka Awdal Gaar Ahaan Degmada Borama



Borama 27 June, 2024 {WHM} - Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Axmed Wayrax ayaa kulan aqoon-korodhsiya u furay qaar ka mid ah shaqaalaha Wasaaradda ee Gobolka Awdal gaar ahaan Degmada Borama.

Tabobarka oo ah mid kor loogu qaadayo ogaalka iyo wacyiga shaqaalaha Wasaaradda waxa uu ku saabsanaa arimaha ay ka mid ka yihiin; qab-dhismeedka, waajibaadka, hiigsiga iyo himilada Wasaaradda H. Maaliyadda JSL, xayndaabka sharci ee ay Wasaaraddu ku hawlgasho, daryeelka cashuur-bixiyaha [macmiilka] iyo arimo kale oo la hal-maala.

Tabobarkan oo in mudo ahba ay Waaxda Cududda-shaqaaluhu waday waxa is la usbuucan gudihiisa loo soo qabtay shaqaalaha ka hawlgala kastamada Saylac, Lawyo-Cado iyo Cashacado, waxaana qorshaysan in mid kan la mida loo qabto shaqaalaha ka hawlgala Gobolada Sanaag, Saaxil iyo Togdheer.

Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha Md. Wayrax oo tabobarkani furay waxa ka mid ahaa hadaladiisii sida tan:

“Waxa aanu idiinku nimid tabobar kooban oo aanu runtii ka Wasaarad ahaan is leenahay wax buu idiin soo kordhin doonaa, ujeedka uu daaranyahay tabobarkani waxa weeyi in qof kasta oo shaqaalaha Wasaaradda ka mid ahi ka jawaabi karo guud ahaan waajibaadka Wasaaraddu u idmantahay. Wasaaraddu waxa ay ka koobnatahay 14 Waaxood, afar iyo tobankaas Waaxood mid kasta waxa ay qabato inuu yaqaano”.

Geesta kale, waxa uu Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha Md. Maxamed Axmed Weyrax ujeediyey shaqaalihii ka qayb qaadanayey tabobarka hadalo dardaaran iyo dhiirigalin ah isaga oo xusay in shaqooyinka ay qabtaan iyo musharka ay qaataan inaanay isu dhigmin balse taa badelkeeda ay naftooda ku qanciyaan inay u shaqayanayaan Dalkoodii.





Buugga Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha

4.2 Ajuuradda Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha Deggennaanshaha'

4.2.1 Waa maxay ajuuradda Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha deggennaanshaha'?

Ajuuradda dal-ku-jooggu "fiisaha deggennaanshahu" waxa weeye lacagta laga qaado dadka sita ama haysta passport-ka ajaannib-ka ah, ajuuradda dal-ku-joogga (fiisaha deggennaanshahu) waxay ku waajibtaa cid kasta oo aan u dhalan waddanka ama dalkan jamhuuriyadda somaliland oo ajaannib ah.

4.2.2 Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha Deggennaanshaha'?

Ajuuradda Dal-ku-joogga (Fiisaha deggennaanshaha) waxa ay ku xidhan yahay kolba muddada uu rabo waxaana la bixiyaa:-

- Hal Bil waa \$77
- Seddex (3) billood na waa \$138
- Lix billood kana waa \$248
- Sannadka oo ah **\$306**

Waxaana lagu bixiyaa: "Xafiiska Cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ee ku yaalla laanta socdaalka."

4.2.3 Side loo bixiyaa ajuurooyinka Fiisaha Deggennaanshaha?

Habka iyo sida loo bixinayo ajuuradda dal-ku-jooggu waa sidan waxaad geynaysaa xafiiska laanta socdaalka, qaybta shisheeyaha

- Codsii lagu dalbanayo muddada joogitaanka dalka ee qofka ajaannib ka ah iyo
- Nuqulka (Copy) passport-ka qofka ajaannibka ah xafiiskaasa hubinaya ka dib u soo diraya xafiiska cashuuraha berriga ee laanta socdaalka ku yaal.

4.2.4 Haddii iiga dhaco fiisaha deggennaanshahu maxaa igu dhacaya?

- Maalin kasta oo dheeradda ah waxa laguugu dhufanayaa \$5

4.3 Ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)

4.3.1 Waa maxay ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?

Ajuuradda ogolaanshaha shaqo Waxa weeye lacagta laga qaado dadka ajaanib ka ah, ee loo ogolaaday in ay ka shaqaystaan gudaha dalka, waxaanay ku waajibtay qof kasta oo ajaannib ah oo shaqo ka haya ama ka doonaya gudaha dalka.

4.3.2 Side loo bixiyaa ajuurooyinka Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?

Waxaa loo bixiyaa: "Waxa aad Juwan lacag-qabasho ka soo goosanaysaa Xafiiska Cashuuraha Berriga ee ku yaal laanta socdaalka."

Waxaa lagaaga baahan yahay:-

- Arji codsi ah
- Iyo ogolaanshihii joogitaan kaaga

5 Xafiisyadda Cashuuraha Berriga

5.1 Xaggee Ayey Ku Yaallaan Xafiisyada Cashuuraha Berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay ku yaallaan, Gobolka Maroodi-jeh, Awdal, Togdheer, Sahil, Sool, Sanaag, Saraar, Gabiley, Oodweyne, Baligubadle iyo guud ahaan degmooyinka dalka oo dhan.



5.2 Wakhtige ayey shaqeeyaan xafiisyada cashuuraha berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay shaqeeyaan, 7:00 subaxnimo ilaa 2:00 duhurnimo. Sidoo kale waxaa jira xafiisyo cayiman oo gelinka dambe shaqeeya dhammaan gobollada dalka.

5.3 Ciwaannadee ayaan kala xidhiidhi karaa xafiisyada cashuuraha berriga?

Ciwaannada aad kala xidhiidhayso Xafiisyada Cashuuraha berriga waxaad ka helaysaa mareegta wasaaradda maaliyadda lifaaqa Web: www.slmof.org.

5.4 Xaggee ayaan ka heli karaa xog ama macluumaad cashuureed?

Waxa aad xog ama macluumaad aad ka heli kartaa dhamaan xafiisyada Cashuuraha Berriga ee gobol kasta. Sidoo kale waxaad xog ka heli kartaa xafiisyadan kala ah:

- Xafiiska Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarunta Cashuuraha Berriga **TEL: 3535 Web: www.slmof.org**.
- Xafiisyada Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarumaha Degmooyinka Gobolka Maroodi-jeex-**520762/4229502**
- Xafiisyada Xogsiinta (One Stop Shop) ee ku dhexyaala Wasaaraddaha Ganacsiga, wershadaha iyo Dalxiisa, Cadaaladda, Hawlaha Guud & Gaadiidka iyo xarunta Ciidanka Laanta Socdaalka. **0634470275**
- Xafiiska Cashuuraha Berriga ee Rugta Ganacsiga. **4086638**

Buugga Qiimaynta Badeecadaha (Customs Valuation Book 2020)

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
Chapter 24					
Tobacco and manufactured substances					
2401.10	Electric Cigarette	121100	Per Pcs	\$3.00	80%
2401.10	Tobacco in Leaves (Jamali, Xamumi)	121100	Kg	\$ 0.60	80%
2402.20	Benson 14 kgs	122200	Gross Per/Kg	\$ 2.75	80%
2402.20	Rothman, Cartier, Marlboro, Dunhill, Craven, Embassy by Gross weight 14 kgs	122200	Kg	\$ 2.50	80%
2402.20	Player, Peter, Benson, Bond, Kent Winston, London Gross weight. 12Kgs	122200	Kg	\$ 2.00	80%
2403.30.00	Royal. 12 Kgs	2403.30	Kg	\$ 2.50	80%
2403.40.00	Other Cigarettes. 12 Kgs	2403.40	Kg	\$ 1.50	80%
2403.91.00	Tobacco in Tines Packets and any kind of tobacco homogenized	122391	Kg	\$ 1.8	80%
2403.99.00	Chewing Tobacco	122391	Kg	\$ 1.5	80%
Chapter 25					
Salt, sulphar earths & stone plastering material lime and cement					
2510.10	Chalk	272310	Per PKT	\$0.02	25%
2501.00.	Rock Salt	278910	Per Kg	\$0.04	50%
2510.10	Asbestos sheets	278400	Per sheet	\$3.00	10%
2524.00	Rock Salt	278310	Per Kg	\$0.04	50%
2501.00	Common Salt	278390	Per Kg	\$0.05	50%
2501.00	Table salt	278390	Per Kg	\$0.50	50%
2523.21	Cement	66122	Per bag of 50KGs	\$2.00	10%
2523.21	White cement	66122	Per bag of 50KGs	\$2.50	10%
2523.21	Gypsum Powder	66122	Per bag of 50KGs	\$2.50	10%
2523.21	Bentonite Powder	66122	Per bag of 50KGs	\$2.50	10%
2523.21	Limestone	66122	Per bag of 50KGs	\$1.00	15%
2523.90	Magadi	661290	Per Kg	\$0.10	10%

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
Chapter 27					
Mineral Fuels, Mineral oils and products of their distillation, bituminous substances; mineral waxes					
2715.00	Bitumen	335430	Per Tons	\$ 50	15%
2715.00	Agglomerated	335430			15%
2703.30.00	Peat for cooking	2703.30			15%
2705.00.00	Coal gas, water gas, producer gas and smaller gases, other than petroleum gas and others gas hydrocarbons	345000	Per lts	\$0.15	25%
2710021	Jet A1	3341100	M ³	\$424.30	5%
2710042	Gas oil FL 13%	33430	M ³	\$250.10	10%
2710027	Mogus (petrol) FL 13%	334113	M ³	\$209.30	15%
334505	Engine Oil FL 3.5%	3344090	Lts	\$ 0.40	15%
27100059	Hydraulic Oil	334505	Lts	\$ 0.80	15%
27100059	Brake fluid	334505	Lts	\$ 0.60	15%
27100032	Kerosene	334219	M ³	\$ 140	5%
27100059	Gear Oil	334505	Lts	\$ 0.40	15%
2711.19	Butanes	342500	Lts	\$ 0.30	25%
2710.00.49	Ordinary Grease oil	334501	Kg	\$ 0.35	15%
2710.0049	Other Gases	334401	Lts	0.30	25%
2710010	Crude Oil	334301	M ³	\$ 100	15%
27100041	Heavy Duty Moe-sine	335430	M ³	\$ 126	15%
271500	Asphalt	351000	Tone	\$ 75	15%
271600	Electrical Energy	351000	1000 KW/H	\$ 0.32	5%
Chapter 28					
280620	Hydrochloric Acid	522311	LTR	\$ 0.50	25%
280620	Caustic Hydrochloric Soda	522311	LTR	\$0.30	25%
280700	Sulphuric Acid	522321	LTR	\$ 0.50	25%
280700	Distilled Water	524992	LTR	\$ 0.05	25%
280700	Water Radiator	524992	LTR	\$0.10	25%
Chapter 29					
Organic Chemicals					
2901.29.00	Acetylene	2901.29	Kg	\$ 0.40	15%

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
2915.22.00	Sodium Acetate	2915.22	Kg	\$ 0.50	15%
2933.61.00	Melamine	2933.61	Kg	\$ 0.60	15%
	Chapter 30				
	Medicines				
	European Medicines				
	General Anaesthetics				
3004.10	Ether (Anaesthetic) 2 X 500 ml (UN 1155)	542130		\$15.75	10%
3004.10	Halothone 250 ml (UN2810)	542130	1 L	\$20.25	10%
3004.10	Ketamine 50 mg/ml. 10 ml	542130	1 Bottle	\$14.25	10%
3004.10	Thiopental sodium 0.5 g/vial	542130	25 Vials	\$12.16	10%
3004.10	Thiopental sodium 1.0g/vial	542130	25 Vials	\$16.5	10%
3004.10	Local Anesthetics	542130	25 "		
3004.10	Bupivacaine 0.5% 20 ml	542130		\$20.5	10%
3004.10	Bupivacaine 0.5% Spinal heavy, 4 ml	542130	5 Vials	\$14.30	10%
3004.10	Lidocaine HC1 1% 50 ml	542130	5 amps	\$10.33	10%
3004.10	Lidocaine HC1 2% 50 ml	542130	25 Vials	\$10.33	10%
3004.10	Lidocaine HC1 2% + epinephrine, 1:100,000 50 ml	542130	25 "	\$20.5	10%
3004.10	Lidocaine HC1 2% + epinephrine dental, 2.2.ml	542130	25 "	\$24.5	10%
3004.10	Lidocaine HC1 5% spinal heavy (with dextrose 7.5%)	542130	100 crt	\$9.5	10%
	Pre-operative Medication				
3004.10	Atropine sulfate 1 mg/ml, 1 ml	542130		\$7.12	10%
3004.10	Analgeics, Anti Pyretics, Nonsteroidal Anti Inflammatory Drugs, And Drugs Used To Treat Gout	542130	100 amps		
3004.10	Acetylsalicylic acid 300 mg	542130		\$1.5	10%
3004.10	Acetylsalicylic acid 500 mg	542130	1000 Tabs	\$3.10	10%
3004.10	Allopurinol 100 mg	542130	1000 "	\$16.5	10%
3004.10	Ibuprofen 200 mg coated	542130	1000 "	\$6.40	10%
3004.10	Ibuprofen 400 mg coated	542130	1000 "	\$7.5	10%
3004.10	Indometacin 25 mg	542130	500 Tabs	\$13.5	10%
3004.10	Diclofenac sodium 25 mg (etc)	542130	1000 Tans	\$2.38	10%



JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA HORUMARINTA MAALIYADDA

CASHUURTA IIBKA **5%**
ADEEGYADA IYO BADEECADAHA (GST)



**ADEEGYADA
KORONTADA**



**BADEECADAHA
DALKA LAGU
FARSAMEEYO**



**IIBKA
BIYAHA**



**IIBKA AY
HUDHEELADU
SAMEEYAAN**



**IIBKA AY
TELEFISHANNADU
SAMEEYAAN**



**IIBKA
TIGIDHADA
GAADIIDKA**



**ADEEGYADA
ISGAADHSIINTA**



slmof.org



Info@slmof.org

